



Qaybta Falanqaynta
Hubinta Cuntada
ee Soomaalia

HADAL SAXAAFADDEED

*Qaybta Falanqaynta Hubinta Cutada ee Soomaaliya FSAU
oo soo saartay Saadaasha Hubinta Cuntada ee sannadka soo socda*

Waxa la soo
saaray
August, 2005

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha
Gobolka ee
Soo
shaacbaxaya

Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaalia (FSAU), oo ay hirgeliso FAO maalgeliyaanna Mujtamaca Yurub (EC) iyo Hay'adda Maraykanka u qaabilsan Horumarinta Caalamiga ah (USAID), waxay gabagabaysay falanqanteeda sannadka ee hubinta cuntada ee Soomaaliya, iyadoo la kaashatay FEWS NET iyo labaatan hay'adood oo kale oo ay isbaahaysi la leedahay.

Falanqaynta tafatirani waxay ku qiyaasaysaa in 919,000 oo qof oo Soomaali ahi ay u baahanyihiin gargaar degdeg ah sababtoo ah waxay ku jiraan xaalado ah Gurmada Bina-aadamnimo iyo Xiisad hab-nololeedka ah meelaha qaar inta u dhaxaysa iminka iyo bisha January. Dadkaas 542,000 qof waa dad si cusub loo tilmaamay kadib falanqayntan, 377,000 qofna waa dad gudaha dalka ku barakacsanaa.

Iyadoo xaaladda daaqa iyo xoolaha ee dhammaan gobollada waqooyiga iyo kuwa Dhexe ay aad hore ugu martay kadib roobabki xiligan ee fiicanaa (oo dhammeeyey abaartii hore ee 3da sannadood jirtay), meelaha beeralayda ee muhiimka ah ee Koonfurta waxa ka jira roobabka oo dib u dhacay, daadad aad u badan, iyo nabad la'aan sii socota arrimahaas oo keenay soosaarkii dalagga ee ugu xumaa muddo 10 sannadood ah (44% ee Celceliska dagaalkii kadib).

Dadka xaalufay iyo xoola-dhaqatada ay ka baxeen badi xooluhu abaartii hore uga jirtay gobollada waqooyiga iyo kuwa dhexe waxay ku wadaan inay u baahanyihiin gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah iyo taageero hab-nololeedka ah. Gobollada Gedo iyo Jubba waxay ku jiraan xaalad ah Gurmada Bina-aadamnimo oo Halis ah oo sii socota daadadka, soosaarka dalaga oo liita iyo nabad la'aanta sii socota dartood.

Dhammaan Soomaaliya nafaqa-darro aad uga sarraysa heerarka la aqbali karo ayaa ka jirta. Afartii meeloodba meel dadweynaha da'adoodu ay ka yartay shan sano waxa haysaa nafaqa-darro halis ah oo ka sarreeya heerarka la aqbali karo ee caalamiga ah oo ah 15% (Dherarka oo loo eegay culayska qofka). Heerarka nafaqa-darrada ee qaybo ka mid ah gobollada Gedo iyo Juba waxay gaadhayaan in ka badan 20%, taasoo tilmaamaysa in xaaladda hubin la'aanta cuntada ee Soomaaliya ay halis tahay.

Waxa dheer meelaha lagu tilmaamay inay u baahanyihiin gargaar bina-aadamnimo oo degdeg ah, FSAU waxay ku tilmaantay dhammaan qaybta Koonfurta ee Soomaaliya inay ku jirto Xaalad Feejignaan ah xiisadda aan la xalilin ee ka dhex jira Dawladda Ku Meelgaadhka ah ee Faderaaliga ah iyo war sheegaya in la is hubaynayo militari ahaan. Haddii colaad ballaadhani ay dhacdo waxay waxyeello u gaysan doontaa nololaha iyo hab-nololeedka bina-aadamka

FSAU waxay kormeeri doontaa dhammaan arrimaha la xidhiidhka hubinta cuntada bilaha soo socda waxana ay tafatiri doontaa warbixinaheeda marka loo baahdo.

Si aad u heshid warbixin sidan ka faahfaahsan oo ku saabsan beeraha, nafaqada, xoolaha, suuqyada cimilada iyo guudahaan saadaasha hubinta cuntada, booqo websaytkayaga: www.fsausomali.org.

FSAU - Somalia
Kalsion Towers,
Parklands
Box 1230 Village
Market
Nairobi, Kenya

Tel.: +254 20 374 5734
Fax: +254 20 374 5098
email:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

Technical and
Managerial
Support



Funding Agencies



European
Commission



USAID

Technical Partners



Save the Children
UK



FEWS

